

Xeerka Wasiirka Garsoorka, Arrimaha Diinta iyo Shaqada

20 Abriil 1971, lamba. 106.

Dhismaha Qayb joogto ah oo ku saabsanta tayaynta shaqaalaha garsoorka.

WASIIRKU

Marka uu arkay Warqadda Koowaad Kacaanka,
Marka uu arkay Xeerka 3 Juun 1962, lamba. 14 ee Xeerka Shaqaalaha Dawladda iyo
isbaddalladii ka dambeeyay;

Marka uu garowsaday baahida loo qabo in Wasaaradda laga dhiso Qayb joogto ah oo ku
shaqa leh tayaynta shaqaalaha garsoorka;

WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA

Qod. 1

Waxaa laga dhisay Wasaaradda Garsoorka, Arrimaha Diinta iyo Shaqada Qayb joogto ah
o u xilsaran tayaynta shaqaalaha garsoorka.

Qod. 2

Qaybta joogtada ah waxay ka mid noqonaysaa Waaxda Arrimaha Garsoorka iyo
Xirfadaha waxayna u xilsaarantahay in ay carbiso shaqaalaha ku xusan qod. 1 iyadoo leh
dabeecad xiriir joogto ah iyo mid xilliyeed oo firfircoon.

Qod. 3

Qaybta waxaa loo soo jeedin karaa su'aalo iyo in la weydiiyo macluumaad ku saabsan
arrimaha leh dabeecadaha wax qabadadka iyo abaabulidda adeegga.

Qod. 4

Qaybtu waxay abaabulaysaa kolba marka loo baahdo Waxbarasho (koorsooyin) xagga
aragtida-wax-qabadka Garsoorayaasha la qoray, Kaaliyeyaasha iyo Gaarsiyeyaasha iyadoo loo
xilsaarayo khubura maaddadaas ku xeel-dheer.

Qod. 5

Dhammaadka waxbarashada kuwa mutaystay waxaa la siinayaa caddaymo ku saabsan u
qalmidda taaso u dhigmi karta darajo, marka lagu daro shuruudihii kale ee laga baahnaa si uu
xilkaas u sii wato.

Qod. 6

Dekereetadaan si deg-degga ayay u dhaqangalaysaa.

Muqdisho, 20 Abriil 1971.

Wasiirka Dawladda

Prof. Abdulgani Sheikh Ahmed